## SUURAT AL-BAYYINAH:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.*

1. *Ma aha kuwii gaaloobay ee ahaa ehlu kitaabka iyo gaaladii kuwo ka taga ( xumaanta ) intuu uga yimaaddo wax cad ( xuja ah )*

2. *Oo ah Rasuul Eebe oo akhriyi kutub daahir ah*

3. *Oo xukun fiicani ku yaal*

4. *Mana kala tagin gaalada ehlu kitaabka ah intuu uga yimaaddo xaq cad*

5. *Dadkana waxaan Eebe caabudiddiisa ahayn lama farin iyagoo u kali yeeli Eebe diinta, toosanna, salaaddana oogi, zakadana bixin, saaasina waa diinta toosan*

6. *Kuwa gaaloobay oo ehlu kitaabka ah iyo gaaladii waxay gali Naarta Jahannama ayna ku waari dhexdeeda, kuwaasina waa kuwa ugu shar badan khalqiga*

7. *Kuwa rumeeyayse xaqa camal fiicanna falay kuwaasi waa kuwa ugu khayr badan khalqiga*

8. *Abaalkooda ay Eebe agtiisa ku leeyihiin waa Jannooyin Nagaadi, dhexdeedana ay dureeri wabiyaal ay kuna waari dhexdeeda waligood, Eebaa ka raalli noqday iyana way ka raali noqdeen, arrintaasna waxay u sugnaatay ruuxii Eebe ka yaaba.*

Qur’an 98: 1-8

**Sharaxa Suuradaan:**
Suuraddu waxay sheegi xumaanta gaalada iyo inay Nabiga, Qur’aanka iyo xaqaba diidi, hase yeeshee Diintu iyo wanaaggeeduba waa cad yihiin sida maalintoo kale, dadkuna waa laba, mu’min khayr badan oo Janno gali, iyo gaal shar badan iyo xummaan oo Naar gali. ( Eebe ha naga koriyee )